



SALAN GABADHAHA DHIGTA FASALKA 6'AAD

Waxaad naga heleysaa tallaalka looga hortago kansarka ku dhaca minka afkiisa oo ah jeermiska papilloma (HPV). Tallaalkana wuxuu kamid yahay mashruuca tallaalkada qaranka tallaalkaana waxaa la siinayaa dhammaan gabdhaha dhigta fasalada 6'aad.

Jirada-HPV Maxay kugu keeni karaa?

Jirada-HPV waxaa keena jeermiska papilloma. Jiradani waa mid caadi ah, tobbankii qofoodna sideed ayaa qaada intey nool yihiin inta badana xiliga ay dhalinyarada yihiin ayuu ku dhacaa.

Jirada-HPV inta baddan malaha waxaad ku dareento, waana jiro iskeed u reysta. Qiyaastii tobbanka qof ay ku dhacdo jiradaana qof kamid ah ayey ku dheeraataa, taasoo suurogal ahaana keenta cuddurka kansarka nuucyadiisa mid kamid ah. Nuucyadaasna waxay isku bedelaan kansar.

Finland waxaa u jirada kansarka ku dhaca minka afkiisa sanadkiiba ilaa 150 haween. 50 kamid ahna wey u dhintaan.

Tallaalku si xoogan ayuu kaaga difaacayaa kansarkaas

Jeermiska Papilloma-ha waxaa laysaga daartaa xuubka jilicsan ee jirka, siiba waxaa lagu kala qaada galmeynsiga. Tallaalka HPV wuxuu ka difaacaa kansarka uga dhaca minka afkiisa kuna sameeyaa ka hortag jeermiska HPV. Shantii qofoodba afar kamid ah ayuu ka badbaadiyaa kansarka, tallaalkuna waa in la qaataa waqti hore inta dhalinyarada la yahay, taasoo qofku weli qaadin jeermiskii.

Badbaadadda tallaalka waxaa loo leeyahay ogaansho baddan

Mashruucaan tallaalka HPV gabdhaha wuxuu ka jiraa dhammaan dowladaha Galbeedka Yurub iyo Mareekanka. Tallaalka HPV laga soo billaabo sanadkii 2007 waxaa la tallaaley toboneeyo milyan, sidoo kalena lagu sameeyey tixraacis si taxadar leh inuu waxyaabo kale ku keeney. Wax dhibaato halis ah ma laheyn. Dhammaan inta la tallaaleyna xanuun yar oo markiiba daaya ayaa meesha ayaa la soo gudboonaada, sida xanuunka meesha cirbada looga mudey meeshoo gaduudato iyo barar.

Tallaalka waxaad ka heli kartaa oo ka qaadan iskuulka dhexdiisa

Tallaalka-HPV waa lacag la'aan. Taxanaha talaalkani wuxuu ka kooban yahay laba irbaddood, kuwaas oo garabka cududda lagaaga dhufanayo. Tallaalka ugu horeeya iyo kan labaad waa in ay u dhaxayso ugu yaraan shan bilood.

Kalkaalisada caafimaadka iskuulka ayaa ku soo ogeysiineysa waqtiga saxda ee tallaalka.

Kala sheekeyso waalidkaa tallaalka HPV. Wada gorfeeya arrinka oo barta. Faahfaahin dheeriya waxaad ka heleysaan kalkaalisada caafimaadka iskuulka iyo beejka shabakada www.tyttöjenjuttu.fi



TERVEYDEN JA
HYVINVOINNIN LAITOS